

**Xeerka 16<sup>ka</sup> Luulyo 1958, lamba. 5 diw. (AFIS)**

**Waajibaadka maamul ee la siinayo Taliyaha Ururka Madaxabannaan ee Karabiniyeeyriga Talyaaniga ee jooga Soomaaliya.**

#### **MAAMULAHA**

Markuu arkay Shaciga Jamhuuriyadda Talyaaniga, ee 4<sup>ta</sup> Nofember 1951, lamba. 1301, oo ansixinaya, taabbagalna ka dhigaya Mucaahada Wasaayada ee Dhulka Soomaaliya iyo axkaamta ka dambeysa;

Markuu arkay Xeerka 16<sup>ka</sup> Noofember 1956, lamba. 111;

Markuu arkay Xeerka 15<sup>ka</sup> Maajo 1957, lamba. 7;

Markuu arkay Xeerka 16 Luulyo 1968, lamba. 3;

Markuu Tixgeliyey fursdda waajibaadka maamul, ee la siiyey Taliyaha Ururka Madaxabannaan ee Karabiniyeeriga Talyaaniga ee jooga Soomaaliya;

Markuu Dhegeystay Guddiga Maamulka;

#### **WUXUU XEERINAYAA**

##### **Qod. 1**

Waxaa la baabiiyey qodobka 1aad, ee Xeerka 16 Maajo 1957, lamba. 7.

##### **Qod. 2**

Taliyaha Ururka Madaxabannaan, ee Karabiniyeerga Talyaaniga waxaa la siiyey waajibaadka maamul, ee la xiriira shaqaalaha militeriga iyo rayidka ah, iyo shaqaalaha talyaaniga oo maxalliga ah, oo heshiiska loogu qoray Ciidanka Boliiska, ee Soomaaliya, iyo weliba kuwa la xiriira shaqaynta adeegyada Ururka qudhiisa.

##### **Qod. 3**

Qodobka 3aad, ee Xeerka la xiganayo, ee 15 Maajo 1957, lamba. 7, waxaa loo beddelay sidan:

“Wakaaladda ku xusan qodobka 1aad, ee Xeerka 16 Noofember 1956, lamba. 111 waxaa loo fidiyey xataa Taliyaha Ciidanka Cirka, ee Soomaaliya, iyo Taliyaha Ururka Karabiniyeeriga Talyaaniga oo jooga Soomaaliya”).

##### **Qod. 4**

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa 20<sup>ka</sup> Luulyo 1958.

Muqdisho, 16 Luulyo 1958.

Ku-Simaha Maamulaha

**Franca**

Waa arkay Diw.Reg. lamba 26, bugga lamba. 70.

Muqdisho, 16 Luulyo 1958

Xisaab-dhowraha: **Spadaro**